


# Kaalay oo Ka Soo Qeybgal Kulanka Tallo Isweydaarsiga Naqshada Casriyeynta Jefferson ee Oktoobar 30keeda

Fadlan nagala soo qeybgal kulanka soo socda ee T**allo-Isweydaarsiga Bulshada Jefferson ee Naqshada Casriyeynta fiidnimada Arbacada, Oktoobar 30keeda, saacadu marka ay tahay 5:00 fiidkii ilaa 8:00 habeenimada laguna qaban doono Makhaayada Jefferson**.

Fiiri horumarkii ugu dambeeyey ee Kooxda Naqshada sameysay ka dibna waxaad na siisaa warcelintaada sida ay iskula jaanqadayaan aragtida bulshada waxay uu noqonayo Jefferson-ka cusub: soo dhaweyn, dhiirigalin, xaqiijinta dhaqanka, iyo soo bandhigida nuxurka bulsho waxbarasho firfircoon. Kaalay si codkaaga loo maqlo.

Waxaa la qaban doonaa hawlo loogu talogalay dhammaan da' kasta! Waxaa ka soo qeybgalayaasha la siin doona cunto. Waxaa kale oo diyaar u ah turjubaano ka caawiyo haddii aanad ku hadal luqada Ingiriiska, fadlan waxaad email noogu soo dirtaa halkan jhsbond@pps.net maalinta Jimcaha, Oktoobar. 25th marka la gaaro duhurka sidaas darteed waxaan kuu diyaarin karnaa anaka tixgalineyna codsigaaga.

**Kala Soo Deg Xaashiyaha Xayeysiinta Mashruuca Jefferson**
Si aad wax badan uga ogaato wararkii ugu dambeeyey ee khuseeya mashruuca, waxaad ka fiirisaa halkan xaashida xayeysiinta Casriyeynta Jefferson. Xaashida waxaad ka helaysaa macluumaad muhiim ah ku saabsan shaqada iyo mashruuuca oo kooban. Español | Tiếng Việt | Русский | Soomaali | 中文

**Fursadaha Kulanada Laga Qeybgalayo ee Soo Socda**
Bilaha soo socda PPS waxay sii wadi doontaa inay qabato kulano cusub oo taxane ah si la idiin siiyo wararka ugu dambeeya iyo in la idinka helo talladiina haddii aad tihiin bulshada Jefferson. Booqo Shabakada Casriyeynta Jefferson Haddii aad u Baahan Tahay Xog Dheeraad ah.

Waad ku mahadsan tahay taageerida aad naga caawisay abuurida Dugsiga Sarre Jefferson ee cusub
Kooxda Mashruuca Jefferson